Xaashida Xaqiiqda ee Bulshada: Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge'

Dadka qaarkood ee codsada kaarka deganaanshaha 'green card' ama fiise si ay u soo galaan Maraykanka waa in ay ku gudbaan baaritaanka Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed "Public Charge", kaasi oo ah marka mas'uulka dhanka socdaalku go'aamiyo in qof muhaajir ah ay u badan tahay in uu ku tiirsanaan doono taageero uu mustaqbalka ka helo dowladda oo la xiriirta baahiyahiisa aasaasiga ah. **Xeer cusub oo ku saabsan Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge' wuxuu dhaqan gelayaa Sibtambar 18, 2026**. Website-ka Xarunta Sharciga Oregon ka fiiri qaybtii ugu dambeysay Xaashidan Xaqiiqda oo laga helo https://oregonlawcenter.org/, oo https://pifcoalition.org/ ka fiiri macluumaadka cusub ee ku saabsan wixii isbeddelo ah ama caqabado dhanka sharciga ah oo la xiriira xeerka.

Qoysaska muhaajiriinta ah waxay u baahan yihiin in ay ogaadaan saddex arrimood oo muhiim ah oo ku saabsan xeerka cusub ee ku tiirsanaanta gargaarada dowladdeed 'public charge':

1 DADKA BADANKOODU MA AHA IN AY HABA YARAATEE KA WALWALAAN XEERKA KU TIIRSANAANTA GARGAARADA DOWLADDEED 'PUBLIC CHARGE'

- Xeerka ku tiirsanaanta gargaarada dowladdeed 'public charge' **ma** khuseeyo qof walba.
- Xeerka Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge' wuxuu badanaa khuseeyaa oo kaliya dadka xaalada LPR/kaarka deganaanshaha 'green card' ku codsanaya xubin ka tirsan qoys (codsi qoraal ah oo "ku saleysan qoys" oo loogu talagalay kaarka deganaanshaha 'green card').
- Haddii aad hore u haysatay kaarka deganaanshaha 'green card' oo aad joogayso Maraykanka, **Xeerka Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge' kuma saameynayo** (ma aha xataa marka aad dib u cusbooneysiinayso kaarkaaga deganaanshaha 'green card').
- Haddii aadan haysan jid aad mustaqbalka dhow ku heli karto kaarka deganaanshaha 'green card' ee qoyska ku saleysan, **Xeerka Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge' kuma saameynayo** hadda waxaana dhici karta in uusan marnaba ku seemayn.
- Haddii aad hore u ahayd muwaadin Maraykan ah, **Xeerka Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge' kuma saameynayo**.
- Xeerka Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge' **ma** khuseeyo noocyo badan oo ah dadka muhaajiriinta ah. **Baaritaanka Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge' ma khuseeyo dadka muhaajiriinta ah ee kaarka deganaanshaha 'green card' ku codsanaya xaaladaha bani'aadaminimo ee muhaajirka "humanitarian immigrant":**

*Qoxootiga/Magan gelyo doonka
*Dadka iskood codsiga is uu gudbiya VAWA
*Dadka haysta fiisaha T/U
*iyo kuwo kale oo badan!

*Codsadayaasha iyo dadka haysta TPS
*Muhaajiriinta wax u qalanta ee waxyeellada loo geystay
* Dadka qaarkood ee la sii daayay 'parolees'

*SIJS (Dhallinyarada Muhaajirka ah ee Gaarka ah)
*Soo galootiga Cuban ama Haitian ah
*SIV ee loogu talagalay isbahaysiyada Afghan & Ciraaqi ah

2 QAAR KA MID AH FAA'IIDOOYINKA DADWEYNAHA AYAY DHICI KARTAA IN LA TIXGELIYO

- Qofka muhaajirka ah ee codsada kaarka deganaanshaha 'green card' oo "ku saleysan qoyska" ka hor Sibtambar 18, 2026, kaliya SSI, TANF, iyo Daryeelka Mudada Fog oo ka jira Goob xarun ah ayaa loo tixgelin doonaa baaritaankiisa Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge'. Faa'iidooyinka ay helaan xubnaha qoyska ee qofka muhaajirka ah laguma xisaabin doono baaritaanka Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge' ee qofka muhaajirka ah.
- Qofka muhaajirka ah ee codsada kaarka deganaanshaha 'green card' oo "ku saleysan qoyska" ka dib Sibtambar 18, 2026 waxaa khuseyn doona Xeerka Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge' ee cusub. Dhammaan faa'iidooyinka la baaray "means tested" (faa'iidooyinka qof u qalmo waxaa loogu talagalay oo kaliya haddii uu leeyahay dakhli hooseeya) oo uu helo, ama ay helaan xubnahiisa ka tirsan qoyska ee ku tiirsan, waxaa lagu tixgelin karaa baaritaankooda Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge'.

3 XEERKA KU TIIRSANAANTA GARGAARADA DOWLADDEED 'PUBLIC

- Mas'uuliyiinta dhanka socdaalku waa in ay duruufaha qofka u eegaan **si dhammeystiran** marka ay ku dabaqayaan baaritaanka ku tiirsanaanta gargaarada dowladdeed 'public charge', ma aha oo kaliya haddii qofku isticmaalay barnaamijyada faa'iidada ee dowladda.
- Caafimaadka qofka muhaajirka ah, awooda uu u leeyahay in uu shaqeeyo, iyo xasilloonida dhaqaale waa arrimo wanaagsan oo qofka muhaajirka ah ka caawin kara baaritaankiisa Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge' xataa haddii uu hore u soo isticmaalay barnaamijyada faa'iidada ee dadweynaha.

Ma qabtaa su'aalo? Keli kuma tihid. Waxaa jira caawimaad.

Haddii aad hadda ama mustaqbalka dhow codsanayso kaarka deganaanshaha 'green card' oo ku saleysan xubin ka tirsan qoys (codsi qoraal ah oo ku saleysan qoys), la tasho qareenka dhanka socdaalka ama raadso talo sharci ah oo ku saabsan Ku tiirsanaanta Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge'.

- Xarunta Sharciga Oregon iyo Khadka Gargaarka Dadweynaha ee Adeegyada Gargaarka Sharciga ee Oregon ka wac 1-800-520-5292.
- **La soco warka** iyo macluumaadka cusub ee ku saabsan xeerka ku tiirsanaanta gargaarada dowladdeed 'public charge' adiga oo booqanaya https://pifcoalition.org/pc.
- Macluumaad faahfaahsan oo dheeraad ah oo ku saabsan xeerka ku tiirsanaanta gargaarada dowladdeed 'public charge' ayaa laga helayaa https://pifcoalition.org/resources/library/public-charge-what-advocates-need-to-know/

- Ka raadi Buuga Tilmaamaha Adeegyada Dhanka Sharciga Socdaalka ee Qaranka adeegyo dhanka sharciga ah oo lacag la'aan ah ama qiimahoodu jaban yahay.

- Raadi garyaqaanka dhanka socdaalka oo gaar ah oo ku sugan degaankaaga.

- Dadka degan Oregon qaarkood waxaa dhici karta in ay u qalmaan adeegyada dhanka sharciga socdaalka oo lacag la'aan ah oo la adeegsanayo Equity Corps of Oregon. Ogow waxyaabo dheeraad ah oo caawimaad ka raadso https://equitycorps.org/ ama adiga oo wacaya 1-888-274-7292.

- Hel macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cunto lacag la'aan ah oo ka jirta Oregon oo laga helayo https://foodfinder.oregonfoodbank.org/, ama adiga oo wacaya 211.

- Caawimaad la xiriirta arrimaha kale ee dhanka sharciga ah sida guryo, ilmo haysashada, furiinka, shaqada, xuquuqda dhibbanaha, ammarada xakameynta iyo waxyaabo badan ka hel buuga tilmaamaha Caawimaada Sharciga ah ee Oregon ee adeegyada dhanka sharciga ee aan faa'iido doonka ahayn ama Adeega Gudbinta Qareennada ee Ururka Qareennada Gobolka Oregon.

Latino Network

Oregon Law Center
WORKING TOGETHER TO ACHIEVE JUSTICE FOR LOW INCOME OREGONIANS

Latino COMMUNITY ASSOCIATION